

# Booqashada Inta Lagu Jiro COVID-19

Waxaanu ku faraxsanahay inaan kugu soo dhageyno Madxafka Farshaxanka ee Columbus Museum of Art (CMA). Madxafku wuxuu furnaan doonaa Salaasada – Axada laga bilaabo 10:00 am ilaa 5:00 pm iyo Khamiista laga bilaabo 10:00 am – 9:00 pm. Dhamaan booqashooyinka Madxafku waxay u baahan doonaan tigidh galitaan oo taariikhaysan, wakhtina leh. Tigidhaha guud iyo kuwa bandhiga gaarka ah waxay ku diyaar yihiin onlaayn iyo tilifoonba.

Madxafka Farshaxanka ee Columbus Museum of Art wax aka go’an in ay bulshada iyo booqdayaashaba u noqoto goob amaana soo dhaweyna leh. Iyadoo laga jawaabayo karoofayraska (COVID-19) lana taageerayo dadaalada si loo yareeyo fiditaanka fayraska, waxaanu hirgalinay nidaamyo, wadooyin iyo tilmaamo cusub. Waxaanu ku talinaynaa inaad dhuuxdid isbadalada ka hor intaanad booqan. Booqashadaada Madxafku way ka duwanaan doontaa, lakiin ogow in nidaamyadan iyo tilmaamahan loogu talo galay in ay siiyaan amaan iyo khibrad cajiiba oo leh farshaxanimo cajiiba dhamaan booqdayaasha iyo shaqaalaha.

Hoos waxa ah sida loo qorsheeyo booqashadaada iyo nidaamyada iyo tilmamahayaga, la dajiyey iyadoo la raacayo talooyinka rasmiga ah ee caafimaadka iyo dawlada.

Qorsheynta Booqashadaada

Saacadaha:

CMA waxay furan tahay 10:00 AM – 5:00 pm Salaasada – Axada iyo 10:00 am – 9:00 pm Khamiista.

- Tigidhaha mudaysan waxay diyaar noqon doonaa Salaasada, Arbacada, Jimcaha, Sabtida & Axada ilaa 3:00 pm.
- Tigidhaha mudaysan waxay diyaar noqon doonaa Khamiista ilaa 7:00 pm
- Tigidhaha mudaysan loogama baahna booqashada Madxafka ama Maqaaxida Schokko Café

Wakhtiyada Dalbashada:

Salaasada – Axada, booqdayaashu waxay dooran karaan wakhtiyada dalbashada 10:00 am, 11:00 am, 12:00 pm, 1:00 pm, 2:00 pm, iyo 3:00 pm.

Khamiisaha, booqdayaashu waxay dooran karaan wakhtiyada dalbashada 10:00 am, 11:00 am, 12:00 pm, 1:00 pm, 2:00 pm, 3:00 pm, 4:00 pm, 5:00 pm, 6:00 pm, iyo 7:00 pm.

Tigidhaha guud iyo bandhiga gaarka ah waxay diyaar noqon doonaa laga bilaabo Juun 26 booqashooyinka u dhaxeeya Juun 30 iyo Julay 5. Jimce kasta, dalbashooyinka todobaadka cusub ayaa diyaar noqon doona. Hadii aad jeclaan lahayd inaad u qorsheyso booqashadaada horey, fadlan wac 614.221.6801.

Madxafku wuxuu ku shaqeyn doonaa baaxad aad loo yareeyey si loo ogalaado kala fogaanshaha bulshada. Booqdayaasha qeybta ka ah dadka jilicdasaan, dadka waaweyn, ama si fudud taxadir

## Tigidhada Mudaysan:

- Dhamaan booqdayaasha Madxafku waxay hada u baahan doonaan tigidh galiitaanka taariikh leh oo mudaysan si ay u booqdaan. Labada tigidhada guud iyo bandhigyada gaarka ahba waa in horey loo sii iibsadaa ama loogu sii dalbadaa onlaayn ama tilifoon. Waxaan aad ugula talinaynaa booqdayaasha, oo ay ku jiraan Xubnaha, in ay u iibsadaan ama dalbadaan tigidhada galitaanka horey.
- Tiro koobaan oo tigidhada galitaanka maalintiiya ayaa loo heli karaa booqdayaasha imaada iyagoon waxba dalban, lakiin lama damaanad qaadi karo.
- Booqdayaashu waxay heli doonaan mudo hal saac ah oo ay ku bixiyaan tigidhka galitaank waxaanay joogi karaan inta ay rabaan.
- Booqdayaasha yimaada wakhti horey waxa lagu casuumayaa in ay daawadaan bandhiga dibada, Badanaa CMA, ee albaabka Madxafka. Fadlan ku dhaqan kala caalamadaha fogaanshaha bulshada eek u xidhan bandhiga.
- Booqdayaashu waxay dooran in ay ku daabacdaan tigidhada galitaanka guryahooda ama ku tusaan tigidhada galitaanka tilifoonadooda ama moobiladooda. Tigidhada la daabacay ee galitaanka ama dhigijitaalka ah waxa lagu sawiri doonaa Miiska Galitaanka.

## Waxay tahay inaad ogaatid ka hor intaanad tagin: Tilmaamaha Booqashada

- Hadii aad dareentid caafimaad daro ama aad yeelatid astaamaha COVID-19, fadlan soo booqo maalin kale.
- Fadlan isticmaal talaabooyinka ka hortaga sida maydhista gacmaha ugu yaraan 20 daqiiqo iyo isticmaalida nadiifiyaha gacmaha ee ku yaala dhamaan Madxafka.
- Dhamaan booqdayaashu waa in ay ku dalbadaan tigidhka galitaanka oo mudaysan onlaayn ama tilifoon ka hor booqashada. Awooda Madxafka waa la xadidi doonaa oo tigidhada guud iyo kuwa bandhiga gaarka ah waxa loo qorsheyn doonaa iyadoo loo eegayo wakhtiyada imaanshaha. Booqdayaashu waxay heli doonaan mudo hal saaca si ay u bixiyaan tigidhka galitaanka una joogaan inta ay jecel yihiin. Tiro koobaan oo tigidhada galitaanka maalintiiya ayaa loo heli karaa booqdayaasha imaada iyagoon waxba dalban, lakiin lama damaanad qaadi karo.
- Fadlan ixtiraam oo ilaali kala fogaansha bulshada ee lix feet ama in ka badan oo u dhaxaysa kooxaha aan isla socon ee bulshada dhamaan wakhtiyada. Goobaha sida Miiska Galitaanka ee u baahan laayn waxay yeelan doonaan caalamad ku qoran dhulka. Tilmaamayaasha kala fogaanshaha bulshada sida qodin iyo calaamadaha laga heli karo dhamaan Madxafka.
- Daboolida Wajiga = Naxariis. Fadlan xiro daboolka wajiga, hadii aad awoodid, oo loogu talo galay ka hortaga ahaan dhamaan booqdayaasha iyo shaqaalaha. Icticmaalka daboolka wajiga wuxuu muujinayaa ixtiraamka dadka kale amaankooda iyo ilaalintooda. Daboolka

wajiga iyo marada wajigu waxay diyaar ugu noqon doonaan goobta booqdayaasha aan sidan.

- Kaliya hal booqde ama koox bulsho ayaa isticmaali kara wiishka iyo qolalka dharka wakhtigiiba.
- Fadlan xadid tirada alaabaha gaarka ah ee aad keenaysid Madxafka. Intii macquula, fadlan ha usoo qaadan dalaayadaha, koodhadhka, shandadaha, ama alaabaha kale Madxafka si aad u xadid isticmaalka qolalka dharka ee la wadaago iyo goobaha baadhista albaaha.

#### Nidaamyada & Hababka Nadiifinta Badqabta ee Cusub

- Madxafka Farshaxanka Columbus wuxuu taageeray siina wadi doonaa inuu u hogaansamo dhamaan shuruucda maxaliga ah, gobolka iyo fadaraalka ee khuseeya COVID-19.
- Si loo hubiyo kala fogaansho bulsho oo haboon, Madxafku wuxuu ku shaqeyn doonaa awood xadidan bandhigyada, Bakhaarka Madxafka, iyo Maqaaxida Schokko Café.
- Gaanshaanka Plexi ayaa lagu rakibay koobaha diwaangalinta sababo badqabka booqdayaashayada iyo shaqaalaha ah.
- Maababka dhigitaalka ah ayaa ku diyaara onlaayn boga Booqshada. Maababka isticmaalka kaliya, ee la daabacay ayaa diyaar ku ah Miiska Galintaanka.
- Suuliyady way furnaan doonaan si joogto ah ayaana loo nadiifin doonaa loona hagaajin doonaa maalintii oo dhan.
- Xarumaha suuliyada ee Margaret M. Walter Wing waxay leeyihiin qalabka ilaalinta biyaha iyo gacmo qalajiyayaal bilaasha.
- Goobaha gacmo nadiifintu waxay diyaar ku noqon doonaan xarunta oo dhan. Waad ku mahadsan tahay shuraakada Middle West Spirits inaad siisaan CMA gacmo nadiifiyayaal badan oo gudaha lagu sameeyey.
- Madxafku wuxuu cusbooneysiyeey nidaamyada nadiifinta iyo meelaha la taabto oo si joogto ah loo nadiifin doono jeermiskana looga dili doono maalintii oo dhan.
- Meelaha xiran ee la qabsado waa la xiri doonaa ama waxay yeelan doonaan calaamad tilmaamaysa kala fogaanshaha bulshada ee haboon. Mustaqbalka dhow, Qolkayaga bandhiga, Istuudiyaha, iyo Madxafka Kidder way xidhan yihiin.
- Dukaanka Madxafku wuxuu cusbooneysiyeey nidaamyada nadiifinta iyo kala fogaanshaha bulshada. Uma baahnid tigidh mudaysan si aad u booqatid Dukaanka Madxafka.
- Maqaaxida Schokko waxay cusbooneysiisay nidaamyada nadiifinta, dalbashada, fadhiga, iyo warada cunto doorashada. Uma baahnid tigidh mudaysan si aad u booqatid Schokko Café.

- Qalabka midhka ah ee muhiimka ahna oo bilaasha ayaa diyaar ku ah ka codsiga Atrium. Qalabka muhiimka ah waxa ku jira alaabta shakhsiga — golofisyo, qalin beensal, warqado yaryar — oo loogu talo galay isticmaalka waxqabadyada gacmaha.
- Waxqabadyada gacmaha ee Xarunta Hal abuurka waxa loo nadiifin doonaa si saacad leh ah.
- Gawaadhida dadka naafada ah ee Madxafku bixiyey, tukubayaasha iyo gaadhi curyaanka waa la nadiifin doonaa lagana dili doonaa jeermiska ka hor iyo ka dib isticmaalka.
- Albaabada halka jiho ayaa la hirgaliyey halka ay daruuri tahay goobaha bandhiga iyo farshaxanka.
- Daboolada wajiga ayaa qasab lagaga dhigay dhamaan shaqaalaha iyadoo la raacayo shuruucda gobolka.
- Dhamaan xubnaha shaqaaluhu waxay fuliyaan baadhis caafimaad oo maalin leh ka hor bilowga shaqada.
- Dhamaan xubnaha kooxda shaqaaluhu waxay raacaan tilmaamo wanaagsan oo nadaafada shakhsiga ah, oo ay ku jiraan maydhista gacmaha iyo nadaafad la kordhiyey.
- Qalabka badbaadinta shakhsiga oo dheeraada (PPE), gacmo nadiifiyeyaal, qalabka nadiifint iyo jeermis dilista ayuu Madxafku bixiyey.
- Dhamaan shaqaalaha kasoo shaqeyn kara guriga ayaa lagu dhiiri galiyey in ay sidaasi sameeyaan. Kuwa ka shaqeynaya goobta shaqada waxa la siiyey jadwal la qorsheeyey si loo yareeyo khatarta.
- Dhamaan xubnaha kooxda shaqaaluhu waxay leeyihiin fasax mushahar leh haday xanuusadaan. Xubnahaasi shaqaalaha ee aan ka gudbin baadhista caafimaad ama kuwa buka waxaa looga baahan yahay in ay joogaan guriga.

#### Bandhigyada, Dalxiisyada & Barnaamijyada

- Bandhigayaga khaaska ah ee aadka loo soo dhaweeyey *Farshaxanka ka dib Stonewall, 1969-1989* waxaa lagu kordhiyey ilaa October 4, 2020.
- Dhamaan dalxiisyada goobta, gaarka ah ee dadweynuhu hada waa la hakiyey ilaa Ogos.
- Dhamaan barnaamijyada goobta, shakhsiyga dadweynaha hada waa la hakiyey ilaa Julaay. CMA waxay sii wadi doontaa in ay bixiso barnaamijyo onlaayn ah iyo khibrado. Fadlan ka hubi xafladahayaga & barnaamijyada jadowalka taariikhaha cayiman.
- Bandhigyada xagaagu hada waa Istuudiyaha Guriga. Fadlan hubi boga Istuudiyaha Guriga ee khibraha onlaaynka caruurta da'da dugsiyada ilaa dugsiga dhexe.

Su'aalaha Badanaa La Is Weydiiyo

Goorma ayuu Kaydka Pizzuti ee CMA dib u furmayaa?

Kaydka Pizzuti ee CMA wuxuu dib u furmayaa dhamaadka Ogos ama horaanta Sabteembar, marka bandhigyada jilaalku furmaan.

Ka waran baarkinka?

Baarkinka Madxafku waa sidii sii. CMA waxay ku shaqeysaa baarkinka East Gay Street halkaasi oo xubnuhu ay si xora ugu baarkin gareysan karaan oo dhamaan booqdayaashu bixin karaan khidmad \$5 ah. Waxaanu kula talinaynaa in booqdayaashu ku bixiyaan lacagta albaabka. Xubnuhu waxay wali ka heli doonaan baarkin la ansixiyey Miiska Galitaanka. Maabka baarkinku waxa laga helayaa boga Booqashada.

Miyaan u baahnahay inaad dalbo tigidh ama sameeyo dalbasha onlaayn ah si aan u booqdo Dukaanka Madxafka ama Schokko Café?

Ugama baahnid tigidh mudaysan ama dalbasha onlaayn ah dukaanka Madxafka ama si aad wax uga cuntid maqaaxida Schokko Café. Iyadoo ay ugu wacan tahay awood xadidan, waxaan kaa codsanaynaa dulqaadkaaga wakhtiyada sugitaanka ama dib u dhaca adeega ee ay keentay tilmaamaha kala fogaanshaha bulshada.

Miyaan u baahanay tigidh taariikh iyo wakhti leh si aan u booqdo Axada bilaashka ah?

Yes. While admission on Sundays remains free, all visitors need to reserve a dated, timed admission ticket to enter. Special exhibition fees may apply on Sundays. A small amount of day-of admission tickets may be available for visitors who arrive without reservations, but cannot be guaranteed. Haa. Inkastoo galitaanka Axadu bilaash yahay, dhamaan booqdayaashu waxay u baahan yihiin tigidh galitaan oo mudo iyo wakhti leh si ay u galaan. Kharashka bandhiga gaarka ah ayaa ku jira sidoo kale Axada.

Ka waran hadii aan imaado ka hor ama ka dib wakhtigii dalabkayga?

Si aan u yareyno cidhiidhiga, booqdayaashu ma gali karaan Madxafka ka hor wakhtigooda. Haddii aad timaadid ka hor wakhtiga dalabkaaga, waxaan kugu casuumaynaa inaad daawatid Always CMA, bandhig cusub oo ay u sameysay CMA farshaxanka Melissa Vogley Woods.

Tigidhida wakhtiga leh, miyaan u baahnahay inaan ka tago marka wakhtigaygu dhamaado?

Uma baahnid inaad tagtid marka wakhtigaagu dhamaado. CMA waxay la socon doontaa awooda booqdaha waxayna sixi doontaa galitaanka si loo hubiyo khibrad badqabta oo fiican oo qofkastaba helo.

Ka waran hadii aan u baahnahay inaan dib qorsheysto tigidhkayga?

Fadlan wac 614.221.6801 si aad dib ugu qorsheyso tigidhkaaga.

Waxaan haystaa qaansheeg bilaasha oo galitaan, sidee baan u dalbadaa tigidhkayga?

Fadlan wac 614.221.6801 si aad u bixisid qaansheegta ama u heshid galitaan bilaasha

Macluumaad dheeriya oo ku sahabsan karoona-fayras iyo talaabooyinka taxadirka, fadlan booqo shabakadan soo socota:

[Xarunta Xakameynta iyo Ka Hortaga Xanuunada– COVID-19](#)

[Haayada Caafimaadka Aduunka – COVID-19](#)

[Waaxda Caafimaad Ohio – COVID-19](#)

[Caafimaadka Dadweynaha Columbus](#)